Miyaad dhibaato kala kulantaa adeegga dowladda hoose ama gobolka?

Ma dareentaa in laguula dhaqmo si cadaalad-darro ah ama ixtiraam la'aan ah?

Miyaad wajahdey dib-u-dhac dheer, ama dhibaato maku qabtey in aad jawaabo hesho?

Ma u baahan tahay macluumaad ku saabsan adeegyada aad xaqa u leedahay?

**Waan ku caawin karnaa.**



Natiijooyinka suuragalka ah ee laguugu talagalay waxaa ka mid ah:

- Beddelidda siyaasadda aan cadaaladda ahayn
- Sii wanaajinta adeegga liita
- Helidda sababaha waxa kugu dhacay
- Helidda lacagta ama dheefaha ee aad dad ku lahayd

# BALLANQAADKEENNA

Marka aan aqoonsano dhibaatooyinka oo aan soo-jeedino xallalka, waxaan gacan ka geysaneynaa sii wanaajinta xiriirka u dhaxeeya dadka Ontario iyo hay'adaha dowladda ee u adeegga.

Waxaa naga go'an in aan xallino cabashooyin iyo sameynta talo-soo-jeedino kor-u-qaadi doonna adeegyada, kor-u-qaadista xuquuqaha aadanaha iyo caawinta dadka nugul.

Ombudsman ONTARIO

Madax-bannaan Dhexdhexaad ah Sir ah Bilaash ah

**Nala soo xiriir:**

Office of the Ombudsman of Ontario
483 Bay Street, 10th Floor, South Tower
Toronto, ON M5G 2C9

1-800-263-1830
TTY (teletypewriter, mashiin-ka toogta): 1-866-411-4211
www.ombudsman.on.ca
Email-ka: info@ombudsman.on.ca

Facebook: Ontario Ombudsman

X: @Ont_Ombudsman iyo Ont_OmbudsmanFR

Instagram: OntOmbuds

Ombudsman ONTARIO

## Miyaad qabtaa walaac ku saabsan adeegga gobolka ama dowladda hoose ee Ontario?

## Waan ku caawin karnaa.



www.ombudsman.on.ca

1-800-263-1830

Madax-bannaan Dhexdhexaad ah Sir ah Bilaash ah

# WAA MAXAY XAFIISKA DIFAACA XUQUUQDA DADWEYNAHA?

Xafiiska Difaaca Xuquuqda Dadweynaha waa mid bilaash u ah qof walba oo Ontario ku nool ee dhibaato ku qaba adeegga dowladda hoose ama gobolka.

Waxaan xallinaa cabashooyinka, baarnaa arrimaha, oo aan sameynaa talo-soo-jeedin lagu sii wanaajinayo adeegyada dadweynaha.

**"Xafiiska difaaca xuquuqda dadweynaha" waxaa loola jeedaa sarkaal dhexdhexaad ah, madax-bannaan oo walaacyada dadku ay qabaan soo gaarsiiya hay'adaha dowladda."**



# WAXAAN KAA CAAWIN KARAA:

- ServiceOntario (shatiyada darawalka, kaararka caafimaadka, warqadaha dhalashada)
- Ururrada gargaarka carruurta, kooxda iyo guryaha lagu koriyo carruurta ee loogu talagalay carruurta iyo dhallinyarada
- Guddiyada iskuulka, kuliyadaha, jaamacadaha iyo barnaamijyada caawinta ardeyga
- Rukhsadaha, barnaamijyada iyo adeegyada dowladda hoose
- Xarumaha asluubta iyo xarumaha cadaaladda dhallinyarada
- Barnaamijka Taageerada Naafada ee Ontario (ODSP), Ontario Works iyo dheefaha kale ee bulshada
- Qorshaha Caymiska Caafimaadka Ontario (OHIP), Dheefta Daawada Trillium iyo barnaamijyada kale ee daawada
- Xafiiska Mas'uuliyadda Qoyska (FRO)
- Guddiga Caymiska iyo Bedqabka Goobta Shaqada (WSIB)
- Guddiga Deganaha iyo Mulkiilaha Guriga iyo fadhiyada kale ee garsoorka
- Adeegyada lagu bixiyay luuqadda Faransiiska ee waafaqsan *Xeerka Adeegyada Luuqadda Faransiiska*

# WAXA AAD NAGA FILAN KARTO

- Waxaan si ixtiraam leh u dhageysan doonnaa sheekadaada waxaanna ku weyddiin doonnaa xoogaa su'aalo ah.
- Waxaan ilaalin doonnaa asturnaantaada.
- Waxaan sameyn doonnaa su'aalo weyddiinta adeegga dowladda si aan u go'aamino haddii ay kuu cadaalad faleen.
- Waxaan ka madax-banaannahay dowladaha oo dhan. Saraakiisha dowladda hoose iyo kuwa gobolka waxaa looga baahan yahay in ay nala shaqeeyaan.
- Annaga dhinacna uma eexano. Haddii aan aragno wax aan cadaalad ahayn, waxaannu ka shaqeyn doonnaa sidii aan u sixi lahayn.
- Waxaan iskudayi doonnaa in aan arintaada si dhaqso ah u xallino. Haddii ay tahay mid ka baxsan awoodeenna oo ayna jirto hay'ad kale oo wax ka qaban karta dhibaatada, waxaan kaa caawin doonnaa in aad la xiriirto.
- Adeegyadeennu waa kuwo bilaash ah.

Ombudsman ONTARIO

Madax-bannaan  Dhexdhexaad ah  Sir ah  Bilaash ah